Centerpartiets valfolder 2018 översatt till Somaliska.

# JIDKAAYAGA: HORE!

Doorashada dayrtan waa wakhtiga ugu muhiimsan in mudo ah. Waxaynu ku nool nahay wakhti sabaynaya kaas oo dad badan u muujinaya mustaqbal waxbayahay ah – oo ay la socoto faafitaanka aamin darradu oo marka danbena nacayb ka dhalanayo. Intii hore wax ka badan, iminka ayaan u baahanahay Inaynu naxariista u istaagno, oo aynu awood u yeelano inaynu aragto fursadaha oo aynu aamino awooda wada bilaa aadanka. Sidii hore waxay kasii muhiimsan tahay maanta inaynu go'aansano dhanka aynu nahay. Anaka, jawaabtu way noo cadahay, Waxaanu doonaynaa inaanu hore u socono.

**Sweden hore u kaxee.**
**U Codee Centerpartiet!**

www.centerpartiet.se





## JIDKEE AYAAD DOORANAYSAA?

Noloshu si wanaagsan ayay uga socotaa Sweden siyaabo badan. Laakiin dhamaanteed maaha.
Is dhax galkii ayaa yaraanaya, kuyuuga daryeelka caafimaadka ayaa kordhaya, wasakhda hada ayaa kordhaysa Sweden waxay khatar ugu jirtaa inay noqoto dal kala qaybsan.

Waxa gebigeedaba aynu kala taaganahey laba jiho. Halka ay dadka kale ka arkaan mushkilada oo kaliya, anaka waxaa noo muuqata fursada. Halka ay kuwa kale ka doorteen nacaybka, anaku naxariista ayaanu dooranay. Halka ay kuwa kale koritaanka u arkayaan khatar deegaan, anaka waxaa noo muuqda fursado cusub, iyo shaqooyin kasoo baxa ilaalinta deegaanka. Sidoo kale halka ay kuwa kale ka faafinayaan cabsi, anaku waxaanu abuuraynaa amaan.

Halka looga carari lahaa, waanu kusoo dhawaan Meesha daran, waxaanu la doonaynaa dariiq ka duwan dhamaan Sweden: hore.

## WAXAAN DOONAYNAA INAANU ILAALINO WADA JIRKA SWEDEN

Sweden waxay khatar ugu jirtaa inay noqoto bulsho qaybsan. Mid ka mida qaybsanaanta ugu wayni waxey u dhaxeysaa dadka shaqada haysta iyo kuwa aan haysan. Waxaanu doonaynaa inay dad badan fursad u helaan inay shaqo helaan, ka qayb galaan oo ay nolol maalmeedkooda lasoo baxaan. Waana taas sababta aanu u doonayno:

- In loo fududeeyo dadka helitaanka shaqada ugu horeysa.
- Inayna qaali ku noqon ganacsiyada yaryar inay shaqaale qabsadaan.
- In loo fududeeyo inay shirkaduhu Sweden oo dhan ay shaqooyin ka abuuraan.

## WAXAANU DOONAYNAA INAANU SWEDEN DHAMAANTEED AMAAN KA ABUURNO

Halka aad doonto hadaad ka degan tahay Sweden, waa inaad nabad ku seexataa adiga oo og daryeelka caafimaadka iyo bilayskuba inay kuu dhaw yihiin. Waana taas sababta aanu u doonayno:

- In la kordhiyo tirada ikhtiyaarada lana yareeyo kuyuuga daryeelka caafimaad.
- In qof kasta fursad loo siiyo inuu dhakhtar u igmado ka masuul noqonaya daryeelkiisa caafimaad.
- In la xaqiijiyo in dulqaadka dambigu uu noqdo eber oo kor loo qaado tirada bilayska dhamaan dalka.

## WAXAANU DOONAYNAA INAANU MAALGALINO KORIINKA CAGAARAN

Wasakhdii hawada ayaa badanaysa waxaanay saamayn ku yeelatay cimiladii. Uma aragno hormad iyada oo aynu deegaanka khatar gelinayno laakiin waxaanu fursad ka aragnaa in la hormariyo oo shaqooyin badan la abuuro iyada oo deegaanka la ilaalinayo. Waana taas sababta aanu u doonayno:

- In la xaqiijiyo inay Sweden si buuxda ugu wareegto tamarta la dib loo cusboonaysiin karo.
- In la maal galiyo shidaal deegaanka u wanaagsan.
- In la xaqiijiyo in qof kastaaba noolaan karo iyada oo inuu sumoobo khatar u gelin.